

Sharciga lamba. 43 ee 19 Abriil 1972.

Wax ka Baddalka Xeerka 1 Nofembar 1970, lamba. 67.

GUDDOOMIYAHA GOLAHASARE KACAANKA

Marka uu arkay Warqadda koowaad iyo Tan labaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;
Marka uu helay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU MEELMARIYAY

Xeerka soo socda:

Qodobka Qura

Sida soo socota, waxaa lagu kordhiyay, faqradda shanad qod. 16 ee Xeerka 1 Nofembar 1970, lamba. 67 ee ku saabsan Ilaalinta iyo ka-hortagga Bulshada dambiyada culus qaarkood ee liddiga ku ah Nafta, Ammaanka iyo hantida qofka:

5. – Dambiga ah “dhaca xoolaha” ee Xeerkaan waxaa loola jeedaa wixii leh ulajeeddo uurku taallo qabiil. Dhammaan tuugada iyo burcadnimada xoolaha ee la galo iyagoo ka baxsan xaaladaha kor lagu soo sheegay, waxaa loo aqoonsanayaa dambiyo caadi ah, ee lagu ciqaabi karo Xeerka Ciqaata iyagoo ka dhacaya garsoorka Maxkamadaha caadiga. Xeerkaanu wuxuu dhaqangalayaa laga soo bilaabo taariikhda 21 Agoosto 1971 waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 19 Abriil 1972.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siad Barre